



Aqoonta Bukaanka

Adeegyada Sawirka



Baadhista Lafaha

Sida loo diyaariyo baadhistaada

Lafa baadhuhu waa hab ogaansho iyadoo la isticmaalayo habka daawada nukliyeerka si loo qiimeeyo isbadalada laxidhiidha lafaha iyo kalagoosyada.

Qoraal bixintani waxay sharaxaysaa sida loo diyaariyo baadhista, sida ay baadhistu u shaqayso, sida baadhista loo fuliyo, waxa laga yaabo inaad dareento wakhtiga baadhista, iyo sida aad u helayso natiijadaada.

Waa maxay lafa baadhe?

Lafa baadhe waa habka baadhista daawada nukliyeerka taasoo la isticmaalayo iskudhis ka kooban walax kaah-fal ah si loo baadho xanuuno badan oo lafaha ku dhaca. Waxay ka timid barashada cilmiga s-ray ga, sababtoo ah shucaac ayaa la isticmaalaa si loo helo sawirka jidhka dadka.

Sidee ayuu u shaqeeyaa qalabka baadhistu?

Waxa xididka (I.V.) lagaa siin doonaa qadar yar oo walax kaah-fal ah. Isku dhiskan, oo layidhaahdo tracer, ayaa ku urura lafaha iyo kalagoosyada dhexdooda oo siidaaya falaadhaha gamma. Kamarada gamma ayaa raadisa falaadhaha oo kadibna soo saarta sawirada iyo cabiraadaha lafaha/kalagoosyada.

Sideen iskugu diyaariyaa baadhista?

- Waxaa lagugu dhiiri galinayaa inaad cabto dareere badan.
- Qofka aan jiifi karaynin mudo badan waxa uu u baahanyahay in laseexiyo si loo saaro qalabka lafaha baadha.
- Gabadha uurka leh iyo ta naasnuujinaysa waa inaanay marin baadhista.

Sidee loo sameeyaa baadhista?

1. Iskudhis kaah-fal ah ayaa lagu mudayaa/durayaa mid kamida xididadaada.
2. Waxa lagaa codsandoonaa inaad cabto biyo badan durista ka dib si aad u marto sawirka lafaha iyo ka hor baadhista.
3. Waxaad kusoo noqon doontaa waaxda daawada nukliyeerka 4 ilaa 6 saacadood ka dib si aad u marto sawirkaaga lafaha iyo kala goosyada. Sawirka waxa ka mida inaad si siman u jiifto inta ay kamaradu qaadayso sawirada.
4. Shaybaadhaha ayaa kugu caawin doona inuu nafis kaa dhigo. Sawiridu waxa laga yaabaa inay qaadata 30 ilaa 90 miridh. Waa inaanad dhaqdhaqaaqin wakhtiga kamaradu sawirada qaadayso. Hadii aad dhaqdhaqaaqo, sawiradu waxay noqon doonaan qaar aan si fiican u muuqanin oo waxa laga yaabaa in lagu celiyo.

Su'aalo?

Wac 206-598-6200

Su'aalahaagu waa muhiim. Garaac dhakhtarkaaga ama gargaar bixiyaha caafimaadka hadii aad su'aalo qabto ama talo. Shaqaalaha UWMC ayaa u diyaara inay ku caawiyaan wakhti kasta.

Adeegyada Sawirka:
206-598-6200

Maxaan dareemi doonaa wakhtiga baadhista?

- Xoogaa diiqada ayaa ka timaada xaga xididka (I.V.) wakhtiga la isticmaalayo habka daawada nukliyeerka.
- Bukaanka qaarkood ayay ku adagtahay inay jiifaan miiska baadhista iyagoon dhaqdhaqaaqin.
- Inta badan kaah-falku wuxuu jidhka uga baxaa isagoo raacaya kaadida. Inta soo hadhayna mudo kadib ayay baxdaa.

Yaa tafiira natiijada oo sideen u heli karaa?

Marka shaybaadhku dhamaado, dhakhtarka daawada nukliyeerka ayaa dib u eegi doona sawiradaada, diyaarin doona warbixin, oo kala hadli doona natiijada dhakhtarkaaga. Kadibna dhakhtarkaaga ayaa kaala hadli doona natiijada iyo doorashada dawooyinkaaga. Kala hadal dhakhtarkaaga si aad u ogaato inaad u baahantahay inaad bilowdo iyo inkale hadii ay jiraan wax dawooyin ah oo aad hore u joojisay baadhista darteed.

UNIVERSITY OF WASHINGTON
MEDICAL CENTER
UW Medicine

Imaging Services

Box 357115
1959 N.E. Pacific St. Seattle, WA 98195
206-598-6200

© University of Washington Medical Center
Bone Scan
Somali
05/2005
Reprints: Health Online



Bone Scan

How to prepare for your scan

A bone scan is a diagnostic nuclear medicine procedure used to evaluate abnormalities involving bones and joints.

This handout explains how to prepare for the scan, how the scan works, how the scan is performed, what you may feel during the scan, and how to get your results.

What is a bone scan?

A bone scan is a nuclear medicine exam that uses an injection of a radioactive compound to diagnose many bone diseases. It is a form of radiology, because radiation is used to capture pictures of the human body.

How does the scan work?

You will be given a small amount of a radioactive material through an intravenous (IV) line. This compound, called a tracer, collects in the bones and joints and gives off gamma rays. The gamma camera detects the rays and then produces pictures and measurements of the bones/joints.

How should I prepare for the scan?

- You are encouraged to drink plenty of fluids.
- A patient who is unable to remain still for an extended period of time may require sedation for a bone scan.
- Women who are pregnant or breastfeeding should not have this test.

How is the scan performed?

1. A radioactive compound will be injected into one of your veins.
2. You will be asked to drink a lot of water after the injection and before the scanning.
3. You will come back to the Nuclear Medicine Department 4 to 6 hours after the injection to undergo imaging of your bones and joints. The imaging involves lying flat while the camera takes pictures.
4. The technologist will help make you comfortable. The imaging may take 30 to 90 minutes. You must not move during the time the camera is taking pictures. If you move, the pictures will be blurry and may have to be repeated.

Questions?

Call 206-598-6200

Your questions are important. Call your doctor or health care provider if you have questions or concerns. UWMC Clinic staff are also available to help at any time.

Imaging Services:
206-598-6200

What will I feel during the scan?

- Some minor discomfort during a nuclear medicine procedure may arise from the IV.
- Lying still on the exam table may be hard for some patients.
- Most of the radioactivity passes out of your body in urine. The rest simply goes away over time.

Who interprets the results and how do I get them?

When the test is over, the nuclear medicine doctor will review your images, prepare a written report, and discuss the results with your doctor. Your doctor will then talk with you about the results and discuss your treatment options. Talk to your doctor to find out whether or not you will need to restart any medications that you stopped for this exam.

UNIVERSITY OF WASHINGTON
MEDICAL CENTER
UW Medicine

Imaging Services

Box 357115
1959 N.E. Pacific St. Seattle, WA 98195
206-598-6200